



In nolol cusub lagu bilaabo halkaan waxay ahaan kartaa wax adag...

...khaas ahaan haddii aadan ku hadlin Ingiriisi

ISKAASHATADA LUQADDA INGIRIISIGA NEW ZEALAND

Waxaan la shaqeyna muhaajiriinta iyo qaxootiga dhamaan New Zealand. Waxaan dadka ku kaalmeynaa in ay bartaan Ingiriisi iyo in ay in badan ka fahmaan nolosha halkaan.

YAA NALA BARAN KARA INGIRIISI?

Dadka waaweyn ee New Zealand u yimid in ay ku noladaan una baahan in laga kaalmeeyo Ingiriisiga kuwasoo daggan bulshadooda.


Qaar ka mid dadka waxbarta waxay Ingiriisi ku soo barten waddankooda, waxayna rabaan in ay hagaajiyaan si ay u helaan shaqo una sameystaan asxaab.

Waxaa jira dad kale, uu ku hadalka Ingiriisiga ku cusub yahay.

Dadka barta waxay jecel yihiin in ay awood u yeeshaan in ay ku hadlaan Ingiriisi badan si ay u yeeshaan kalsooni badan. Waxay rabaan in ay iskooda wax u sameystaan, gaaraan himiladooda, qeybna ka noqdaan bulshada.

La shaqeynta muhaajiriinta iyo qaxootiga

SOOMAALI



YAA NALA BARRI KARA INGIRIISIGA?

Inta badan barnaamijyadana waxaa bara macalimiin aqoon u leh luqadda Ingiriisiga, oo la siiyo mushaar.

Hase ahatee, adeegena sida wanaagsan loo yaqaan "ESOL Home Tutor" (Baraha Guriga ESOL) waxaa bixiya kumanaan dad ku shaqeeya iskaa wax u qabso oo soo dhameystay barnaamijkena tababarka dadka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso.

ADEEGYADENA

- Kooxaha luqadda Ingiriisiga
- Tababarka guriga ESOL, kaasoo mid mid ula shaqeeyo ardayda, waa lacag la'aan
- Ingiriisiga la baro Shaqaalaha
- Ingiriisiga la baro Muhaajiriinta (muhaajiriinta horay u soo bixiyay kharashka tababarka ka hor inta aysan imaanin New Zealand)

XARUMAHA QAAR

Xarumaha qaar waxay kaloo bixiyaan Barnaamijka Akhriska ESOL, fasalada danaha gaar iyo barnaamijyo kale ee loogu talo galay deegaanka, sida tababarka shaqada. Waxaa kaloo dhici karto in xarumada bixiyaan kaalmo xagga Ingiriisiga loo baahan yahay in lagu qaato shattiga waddida baabuurta, helidda waxbarashada caruurnimada hore ama fahamka Ingiriisiga looga hadlo goobaha shaqada.

XAQIIQADO FUDUD

8000 kuwa barta luqadda Ingiriisiga

3000 bareyaasha ku shaqeeyo iskaa wax u qabso

280 shaqaale la siiyo mushaar

23 goobo ku yaal New Zealand

SIDA AAD NOOLA SOO XARIIRI KARTID

Waxaa mar kasta la soo dhaweyaa dadka ku cusub barashada iyo dadka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso.

Fadlan wac ama booqo xarunta Iskaashatada Luqadda Ingiriisiga ee deegaankaada.

XARUMADENA



English Language Partners New Zealand

PO Box 12 114, Wellington 6144

Telefoonka (04) 471 2382

Faks (04) 471 2383

Email natoffice@englishlanguage.org.nz

www.englishlanguage.org.nz

